



TB Cudor - Si aad u bogsooto waxaad u baahan tahay daaweyn

Waa maxay TB? TB waa cudurka layiraahdo qaaxada ama tiibishada oo la soo gaabiyey. TB-da waxay ku dhici kartaa qaybkasta oo jirka ka mid ah, laakiin waxay inta badan ku dhacdaa sambabada.

Siday TBda ku fidaa? Marka uu qof TB sambabada uga dhacday qufoco, hadlo, heeso, qoslo ama hindhiso, ayuu jeermiga TB-da hawada ku firdhaa.

Qofkasta oo u dhow ayaa neefsan kara jeermiska TB-da, oo ay sambabada uga faafi karaan. TB-da lagama qaado laqaybsiga saxuunta, koobabka, ama fadhiga musqusha iyo is gacan-geliska.

Maxaan la jirannahay? Waxaad la jirantahay cudurka TB-da sababtoo ah jeermiska TB-da ayaa bilowday in uu jirkaada ku koro. Cudurka TB-da waxay ku dhici kartaa sambabadaada ama qaybaha kale ee jirkaada sida kalyaha, maskaxda ama lafta dhabarta

Waa maxay calaamadaha TB-da?

- Qufac in ka badan 3 todobaad
- Dareen tabar daro
- Miisaan dhac
- Qandho
- Dhiig Quficid
- Habeenkii oo aad loo dhidido
- Dhaxan

TB-da ma halis baa? Haa, cudurka TB-da aad ayuu halis u yahay. Daawada sax ahaadna ku bogsoon kartaa. TB-da waa la daawayn karaa, laakiin waad u dhiman kartaa haddii aanan loo daawayn si haboon.

Sideen u bogsoon karaa? Haddii aad qabto cudurka TB-da waxaad u baahan tahay Daawo. Cudurka TB-da waxaa lagu daweeyaa dhowr daawo oo la isku qaato. Sida badan daawooyinkaas waxa ay dilaan jeermiska TB-da ee jirkaada ku jira.

Ilaa goorma ayay tahay in aan qaato daawooyinka? Ugu yaraan 6 bilood, waa in aad qaadataa daawooyinka si aad u bogsooto. Dadka qaar waxa ay u baahan yihiin in ay qaataan daawada ilaa 2 sano. Aad ayay muhiim u tahay in aad u qaadatao daawada oo dhan sida daryeelaha caafimaadku ku faray.

Maxaa dhici kara haddii aanan qaadan daawooyinkayga? TB-da waa ay soo noqon kartaa, haddii aadan si sax ah u qaadan daawooyinkaada. Jeermiskana waad faafin kartaa. Laga yaabe daawooyinka in aanay dib dambe u dilin jeermiska TB-da.

Sideen u xasuustaa qaadashada daawooyinkayga? Shaqaale caafimaad ayaa kaala hadli doona habka loo qaato daawadaada. Laga yaabe inaad u qaadatao daawadaada sida Daawaynta Tooska ah. (DOT). Shaqaale caafimaad ayaa goob joog noqon doono marka aad daawadaada u qaadanaysid habka (DOT). Habka DOT-da qaadashada daawada ayay kuu sahlaysaa.

Sideen ku bartaa in ka badan? Waxa aad weydiisa dhakhtarkaaga ama kal-kaaliye. Weeydii takhtarkaaga ama kaaliyaha. Waxa aad wacda waaxda caafimaadka xaafadaada ama waaxda caafimaadka gobolka.

Ka ilaali qaaxada naftaada, tan qoyskaada iyo saaxibadaa. Dhamyso daawada TB-da!

Text - Virginia Department of Health Division of TB Control

www.vdh.virginia.gov/epi/tb November 8, 2002

Software by Healthway Software ©2002

This work is licensed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-

NoDerivs License <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/2.5/>

A Healthy Roads Media project

www.healthyroadsmedia.org

Funded by the National Library of Medicine under contract N01-LM-1-3513
from the Greater Midwest Region of the National Network of Libraries of Medicine.